# من مظاهر العظمة في الشريعة الإسلامية السماحة والتيسير

## Muuqaallada weynida shareecada islaamka waxaa ka mid ah sahlanaanta iyo fududeynta

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(يُرِيدُ اللَّهُ بِكُمُ الْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ)

**(Wuxuu idinla doonayaa Alle fudayd ee idin lama doonayo culays)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa oo xadiiskiisa sharafta leh ku yiri:

(بُعِثْتُ بِالْحَنِيفِيَّةِ السَّمْحَةِ)

(**Waxaa layla soo diray diinta sahlan**)

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Waxaan shaki ku jirin muuqaallada weynida shareecada islaamka inay ka badan yihiin in lasoo koobo ama la tiriyo, waxa ugu weyn ee shareecada islaamka u gaarka ah waa sahlanaanta iyo fududeynta, ku arki maysid dhib iyo rafaad sidoo kale culeys iyo adeyg Arrintaas dhib uma keenayo ad'adeegga qaar islaamka sheegta oo u maleeyay iska ilaalinta xagga diinta inay ku jirto ad'adeegga, marka waxay umadda ku fureen albaabada ad'adeegga kuwaasoo keenay xagjirnimada waxaana la siiyay magaca iltisaam iyo iska ilaalin, wuxuuna isu badalay ad'adeegga meel lagu tartamo, sheekada waxay noqotay qof aad isu ad'adkeeya inuu yahay qofka ugu diinta badan uguna badan cabsida Alle - *cazza wajalla* -, Arrinkan wuxuu muujinayaa aqoon la'aanta ay ka qabaan diintan iyo sahlanaanteeda iyo fudeykeeda, Alle wuxuu leeyahay - *subxaanahu* -:

**(وَمَا جَعَلَ عَلَيْكُمْ فِي الدِّينِ مِنْ حَرَجٍ مِّلَّةَ أَبِيكُمْ إِبْرَاهِيمَ هُوَ سَمَّاكُمُ الْمُسْلِمِينَ مِن قَبْلُ وَفِي هَذَا لِيَكُونَ الرَّسُولُ شَهِيدًا عَلَيْكُمْ وَتَكُونُوا شُهَدَاءَ عَلَى النَّاسِ)**

(**mana yeelin diinta dhib, waa diintii aabihiin Ibraahim, isagaana Idiinku magacaabay muslimiin horay iyo Quraankan si rasuulku marag korkiina ugu noqdo, idinkuna aad marag u ahaataan dadka**), wuxuu leeyahay nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

**(إِنَّ الدِّينَ يُسْرٌ وَلَنْ يُشَادَّ الدِّينَ أَحَدٌ إِلاَّ غَلَبَهُ، فَسَدِّدُوا وَقَارِبُوا وَأَبْشِرُوا ، وَاسْتَعِينُوا بِالْغَدْوَةِ وَالرَّوْحَةِ وَشَيْءٍ مِنَ الدُّلْجَةِ)**

(**Diinka wuu fudud yahay, qof iskuma adkeeyo haddii kale wuu ka adkaanayaa, toosiya dhexdhexeysta bishaareysta, kaalmeysta arootii iyo galabtii iyo qeyb ka mid ah dheelmashada**)

Maxaa ka fiican Sufyaan Athori markuu yiri: (cilmiga agteena waa rukhso ka sugnaatay qofka lagu kalsoon yahay, is'ad'adkeynta qof kaste ayaa sameyn kara).

Sahlanaanta shareecada islaamka ma aha erey lagu dhawaaqo ama astaan la muujiyo, ee waa manhaj rabbaani ah, iyo mabda' ka mid ah mabaadi'da oo Ilaahay – *subxaanahu* - kula dhaqmay addoomihiisa, oona faray inay iskula dhaqmaan, wuxuu leeyahay Alle:

**(لَا يُكَلِّفُ اللَّهُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا)**

(**Alle kuma kalifo naf waxayna karin**)

Wuxuu yiri Alle:

**(يُرِيدُ اللَّهُ بِكُمُ الْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ)**

**(Wuxuu idinla doonayaa Alle fudayd ee idin lama doonayo culays)**, wuxuu leeyahay Alle:

**(يُرِيدُ اللَّهُ أَنْ يُخَفِّفَ عَنْكُمْ وَخُلِقَ الْإِنْسَانُ ضَعِيفًا)**

**(Wuxuu doonayaa Alle inuu idinka fududeeyo, waxaase la abuuray aadanaha isagoo tabar yar)**

Aayadda ugu rajada badan kitaabka Ilaahay wuxuu ugu furayaa rabbigeena albaabka rajada iyo cafiska iyo naxariista addoomihiisa oo dhan, wuxuu leeyahay – *subxaanahu* -:

**(قُلْ يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ أَسْرَفُوا عَلَى أَنْفُسِهِمْ لَا تَقْنَطُوا مِنْ رَحْمَةِ اللَّهِ إِنَّ اللَّهَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا إِنَّهُ هُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ)**

(**Dheh (Nabiyow) addoomadayda ku xadgudbay naftoodow ha ka quusanina naxariista Alle, Ilaahay ayaa dhaafa danbiyada dhamaantooda, waana dambi dhaafbadane oo naxariis badane ah**), wuxuu leeyahay:

**(وَرَبُّكَ الْغَفُورُ ذُو الرَّحْمَةِ)**

(**Rabigaaga waa dambi dhaafe naxariis leh**), wuxuu leeyahay Alle:

**(إِلَّا الَّذِينَ تَابُوا وَأَصْلَحُوا وَبَيَّنُوا فَأُولَئِكَ أَتُوبُ عَلَيْهِمْ وَأَنَا التَّوَّابُ الرَّحِيمُ)**

(**Marka laga reebo kuwa toobad keenay oo wanaagga falay oo xaqa caddeeyay, kuwaas waan ka toobad aqbalaa, waxaanna ahay toobad aqbal badane naxariis badan**)

Abuu Hureyra -*Ilaahay raalli haka noqdee* - waxaa laga wariyay inuu Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - yiri:

**(إِنَّ اللَّهَ لَمَّا قَضَى الخَلْقَ، كَتَبَ عِنْدَهُ فَوْقَ عَرْشِهِ: إِنَّ رَحْمَتِي سَبَقَتْ غَضَبِي)**

(**Ilaahay marka uu dhameeyay abuurista wuxuu ku qoray agtiisa carshigiisa korkiisa: naxariistayda waxay ka hormartay caradayda**), Alle wuxuu ku leeyahay xadiis qudsi:

**(يَا ابْنَ آدَمَ إِنَّكَ مَا دَعَوْتَنِي وَرَجَوْتَنِي غَفَرْتُ لَكَ عَلَى مَا كَانَ فِيكَ وَلاَ أُبَالِي، يَا ابْنَ آدَمَ لَوْ بَلَغَتْ ذُنُوبُكَ عَنَانَ السَّمَاءِ ثُمَّ اسْتَغْفَرْتَنِي غَفَرْتُ لَكَ وَلاَ أُبَالِي، يَا ابْنَ آدَمَ إِنَّكَ لَوْ أَتَيْتَنِي بِقُرَابِ الأَرْضِ خَطَايَا ثُمَّ لَقِيتَنِي لاَ تُشْرِكُ بِي شَيْئًا لأَتَيْتُكَ بِقُرَابِهَا مَغْفِرَةً)**

(**Ina Aadamow intaad ii yeeraysid oo aad iga rajo qabtid waan kuu dhaafayaa wixii dembiyo kaa dhaca, anigoon u aabayeelin. Ina Aadamow haddii dembiyadaadu cirka gaaraan, kaddibna aad i weydiisato dembi dhaaf waan kuu dembi dhaafayaa. Ina Aadamow haddii aad iila timaadid dhulka muggiis oo dembiyo ah; kuna dhimatid adigoon iila wadaajinaynin wax kale, waxaan ku siinayaa dhulka muggii oo dembi dhaaf ah**),

Sidaas oo kale Alle wuxuu ugu yeeray addoomihiisa cafiska iyo masaamaxaadda meelo badan ka mid ah kitaabkiisa kariimka, wuxuu leeyahay - *subxaanahu* -:

**(خُذِ الْعَفْوَ وَأْمُرْ بِالْعُرْفِ وَأَعْرِضْ عَنِ الْجَاهِلِينَ)**

(**Qaado cafiska wanaaggana far kana jeedso jaahiliinta**), wuxuu leeyahay Alle:

**(وَلَا تَسْتَوِي الْحَسَنَةُ وَلَا السَّيِّئَةُ ادْفَعْ بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ فَإِذَا الَّذِي بَيْنَكَ وَبَيْنَهُ عَدَاوَةٌ كَأَنَّهُ وَلِيٌّ حَمِيمٌ * وَمَا يُلَقَّاهَا إِلَّا الَّذِينَ صَبَرُوا وَمَا يُلَقَّاهَا إِلَّا ذُو حَظٍّ عَظِيمٍ)**

(**Mana sinna wanaag iyo xumaan, reeb oo (bixi) arrinta fiican markaas waxaa soobixi in midkii col idin dhexyiil uu noqon sokeeye iyo saaxiib * lalamana kulmiyo arrintaas kuwii samray mooyee, lalamana kulmiyo mid nasiib weyn leh mooyee**), wuxuu leeyahay Alle – *subxaanahu* -:

**(وَلْيَعْفُوا وَلْيَصْفَحُوا أَلَا تُحِبُّونَ أَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ لَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ)**

(**Hana iska cafiyaan hana saamaxaan, miyeydaan jeclayn inuu idiin dhaafo Alle, Ilaahayna waa dhaafe naxariista**).

Waxaan shaki ku jirin, qofka fiirfiiriya siirada Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu si dhab u ogaanayaa in nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - uu ahaa mid lagu daydo kan ugu fiican umaddiisa iyo dadka oo dhan xagga sahlanaanta iyo fududeynta, Waxay leedahay Mu'miniinta hooyadooda Caa'isha - *Ilaahay raalli haka noqdee* - iyadoo arrintaas tilmaamayso: (Rasuulka Ilaahay lama doorgalinin labo arrin hadday dhacdo wuxuu qaadan

jiray midka fudud haddii uusan ahayn dambi, haddii uu dambi yahayna wuxuu ahaa midka aad uga fogaado, rasuulka Alle naftiisa uma aargudsanin marka xurmada Ilaahay la jabiyo mooyee wuu u aargudi jiray).

Aan dul istaagno qaar tusaalooyinka siiradiisa ka mid ah xagga dacwada Alle ugu yeerayay xigmada iyo waanada wanaagsan, Anas waxaa laga wariyay inuu yiri: nabiga ayaan la joogay waxaa u yimid nin wuxuu yiri rasuulkii Ilaahayow xad ayaan ku dhacay ee igu oog, wuxuu yiri: ma uusan weyddiinin, salaad ayaa soo gashay wuxuu la tukaday nabiga, markuu dhammeeyay nabiga salaadda ninka ayaa usoo istaagay wuxuu yiri : rasuulkii allow xad ayaan ku dhacay ee igu oog xukunkii Ilaahay, wuxuu yiri: (**Miyaadan nala tukanin?**) wuxuu yiri: haa wuxuu yiri :(**Ilaahay dambigaaga wuu kuu dhaafay**).

Abuu Hureyra -*Ilaahay raalli haka noqdee* - waxaa laga wariyay inuu yiri: Waxaa istaagay reerbaadiye wuxuu ku kaadshay masjidka dadkii ayaa qabtay wuxuu ku yiri nabiga:

**(دَعُوهُ وَهَرِيقُوا عَلَى بَوْلِهِ سَجْلًا مِنْ مَاءٍ، أَوْ ذَنُوبًا مِنْ مَاءٍ، فَإِنَّمَا بُعِثْتُمْ مُيَسِّرِينَ، وَلَمْ تُبْعَثُوا مُعَسِّرِينَ)**

(**dhaafa ku daadiya kaadidiisa wadaan biyo ama wadaan weyn biyo, waxaa laydin soo saaray inaad wax fududeysaan ee laydinma soo saarin inaad wax**

**adkeysaan**), Caa'isho -*Ilaahay raalli haka noqdee* - waxaa laga wariyay inay tiri: Rasuulka waxaa loo keenay cunug yar wuxuu ugu kaadshay maradiisa, rasuulka wuxuu dalbaday biyo wuu iska raaciyay).

Waxaa laga wariyay Mucaawiya bin Alxakam Asulami - *Ilaahay raalli haka noqdee* - inuu yiri: Anoo la tukanayo rasuulkii Ilaahay qof ayaa handhisay oo dadka ka mid ah, waxaan ku dhahay: Ilaahay hakuu naxariisto, dadkii ayaa indhahooda igu soo aaddiyay, waxaan dhahay: ba'ayeey! maxaa idinku dhacay oo aad sidan igu soo fiirinaysaan?, waxay bilaabeen in gacmahooda ay ku garaacaan bowdooyinkooda, markaan arkay inay i aammusniayaan waan aammusay, markuu tukaday rasuulka -hooyaday iyo abbahayga halagu furtee- ma arkin macallin hortiisa iyo gadaashiisa ka fiican waxbarid, wallaahi ima canaananin imana garaacin imana caayin, wuxuu yiri uun:

**(إِنَّ هَذِهِ الصَّلَاةَ لَا يَصْلُحُ فِيهَا شَيْءٌ مِنْ كَلَامِ النَّاسِ، إِنَّمَا هُوَ التَّسْبِيحُ وَالتَّكْبِيرُ وَقِرَاءَةُ الْقُرْآنِ)**

(**Salaaddan kuma habboona hadalka dadka, keliya waa tasbiix iyo takbiir iyo akhrista Quraanka**).

Waxaan shaki ku jirin haddaan raaraacno kitaabka rabbigeena - *subxaanahu* - iyo sunnada nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - waxaan ka helaynaan noocyo ka mid ah ismasaamixidda iyo

fududeynta iyo dhimrinta kuwaasoo ka takhalusaya dhammaan noocyada xagjirnimada iyo xadgudubka iyo dagaalka oo maanta dunida ay ka sheeganayso.

**Dhinaca caqiidada**: waxaan arkaynaa islaamka inuusan qof ku qasbin inuu soo galo, wuxuu siiyay dadka ikhtiyaar wuxuu yiri Alle:

(**لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ قَدْ تَبَيَّنَ الرُّشْدُ مِنَ الْغَيِّ**)

(**Qasab ma aha diinta galiddeedu, hanuunka waa ka cadaaday (soocan yahay) baadida**), wuxuu yiri Alle:

(**وَلَوْ شَاءَ رَبُّكَ لَآمَنَ مَن فِي الْأَرْضِ كُلُّهُمْ جَمِيعًا أَفَأَنتَ تُكْرِهُ النَّاسَ حَتَّىٰ يَكُونُوا مُؤْمِنِينَ**)

(**Hadduu doono rabbigaaga waxaa rumayn lahaa waxa dhulka ku sugan oo dhan, ee ma adaa dad ku qasbi ilaa ay ka noqdaan mu'miniin**).

**Dhinaca cibaadooyinka**: wuxuu ugu yeeray rasuulka fududeyn iyo khafiifin iyo in laga fogaado ad'adayg, wuxuu yiri:

(**إِنَّ منكم مُنَفِّرِين، فَمَنْ صَلَّى بِالنَّاسِ فَلْيُخَفِّفْ فَإِنَّ فِيهِمُ الْمَرِيضَ وَالضَّعِيفَ وَذَا الْحَاجَةِ**)

(**Waxaa idinka mid ah kuwa dadka cararsiiya, qofkii dadka dujiyo ha khafiifiyo maxaayeelay waxaa ku jiro mid jirran iyo mid tabaryar iyo mid dan leh**), markay ka sheegteen dadka qaarkooda sayidkeena Mucaad bin

Jabal - *Ilaahay raalli haka noqdee* - salaadda inuu dheereeyay darteed wuxuu ku yiri nabiga asoo baraya:

**(يَا مُعَاذُ، أَفَتَّانٌ أَنْتَ - ثَلاَثًا - اقْرَأْ: (وَالشَّمْسِ وَضُحَاهَا)، (وَسَبِّحِ اسْمَ رَبِّكَ الأَعْلَى) وَنَحْوَهَا)**

(**Mucaadow ma fitnoole ayaad tahay - seddex jeer - akhri: Washamsi iyo sabixisma iwm.**) riwaayo kale waxaa ku sugan: (**gadaashaada waxaa ku tukada oday iyo mid tabaryar iyo mid dan leh**) Anas -*Ilaahay raalli haka noqdee* - waxaa laga wariyay inuu yiri: Rasuulka ayaa soo galay masjidka waxaaba ku taagnaa labada tiir dhexdooda xarig wuxuu yiri: (**muxuu yahay xariggan?**) waxay dhaheen: waa xarig ay leedahay Zaynab markay daasho ayay qabsanaysaa, wuxuu yiri nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

**(لاَ، حُلُّوهُ لِيُصَلِّ أَحَدُكُمْ نَشَاطَهُ، فَإِذَا فَتَرَ فَلْيَقْعُدْ)**

(**Maya fura, midkiina ha tukado asoo firfircoon, hadduu daalo ha fariisto**), Waxaa laga wariyay Jaabir inuu yiri: waan safarnay qof naga mid ah ayaa dhagax ku dhacay madaxa ayuu ka daqray, kaddib wuu isku junuubay wuxuu weyddiiyay asxaabtiisa wuxuu ku yiri: ma ii heli kartaan rukhso aan ku gabagabbaysto? waxay dhaheen: rukhso kuuma helayno adoo biyaha awoodo, wuu qubeystay wuuna dhintay, markaan u nimid nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - waa loo sheegay wuxuu yiri:

(**قَتَلوهُ قَتَلَهُمُ اللهُ، ألا سألوا إذْ لم يَعلَموا، فإنما شِفاءُ العِيِّ السُّؤالُ، إنما كانَ يكفيهِ أن يَتَيَمَّم ويَعصِرَ -أو يَعصِبَ، - على جُرحِهِ خِرقةً، ثُمَّ يَمسَحَ عليها ويَغسِلَ سائِرَ جَسَدِه**)

(**Way dileen Ilaahay ha dilee may weyddiiyaan haddaysan ogeen, daawada jaahilnimada waa su'aal uun, waxaa ku filnaa inuu gabagabbaysto oo uu ku duubo - ama ku xiro - dhaawiciisa jeex maro kaddib uu masaxo oo uuna dhaqo jirkiisa inta kale**),

Wuxuu hagay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - Cimraan bin Xuseen -*Ilaahay raalli haka noqdee* - markuu jirranaa wuxuu ku yiri:

(**صَلِّ قَائِمًا، فإِنْ لَمْ تَسْتَطِعْ فَقَاعِدًا، فإِنْ لَمْ تَسْتَطِعْ فَعَلَى جَنْبٍ**)

(**Istaag ku tuko haddaadan awoodin fadhi ku tuko haddaadan awoodin dhinac ku tuko**), Wuxuu yiri rasuulka:

(**وَجُعِلَتْ لي الْأَرْضُ مَسْجِدًا وَطَهُورًا فَأَيُّمَا رَجُلٍ من أُمَّتِي أَدْرَكَتْهُ الصَّلَاةُ فَلْيُصَلِّ**)

(**Waxaa layga yeelay dhulka masjid iyo mid wax dahiriyo, qof kastoo ka mid ah umaddayda oo ay salaad soo haleesho ha tukado**) Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu noogu caddeeyay samaaxada si camali ah, waxay noqotay iftiin ka markhaati kacaya weynida islaamka, waxaad

arkaysaa asgoo salaadda ka hadlayo iyadoo ah midda ugu weyn shacaacirta diinta, wuxuu leeyahay:

**(إِنِّي لأَدْخُلُ فِي الصَّلاةِ وَأَنَا أُرِيدُ إِطَالَتَهَا فَأَسْمَعُ بُكَاءَ الصَّبِيِّ فَأَتَجَوَّزُ فِي صَلَاتِي مِمَّا أَعْلَمُ مِنْ شِدَّةِ وَجْدِ أُمِّهِ مِنْ بُكَائِه)**

(**Salaadda ayaan galayaa anoo rabo inaan dheereeyo waxaan maqlayaa oohinta cunugga, waan fududeyaa waxa aan ka ogahay dartii walwalka hooyadii ay la walwalayso oohintiisa**).

**Dhinaca la dhaqanka dadka**: shareecada islaamka waxay ku boorrisay samaaxada iyo fududeynta, dhibka iyo rafaadka in dadka laga qaado marka wax la iibinayo ama wax la iibsanayo ama wax la gudanayo, wuxuu yiri Alle - *subxaanahu* -:

**(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَأْكُلُوا أَمْوَالَكُمْ بَيْنَكُمْ بِالْبَاطِلِ إِلَّا أَنْ تَكُونَ تِجَارَةً عَنْ تَرَاضٍ مِنْكُمْ وَلَا تَقْتُلُوا أَنفُسَكُمْ إِنَّ اللَّهَ كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا)**

(**Kuwa (xaqa) rumeeyow ha cunina xoolihiina dhexdiinna si baadil ah (xaaraam ah) inuu jiro ganacsi aad raalli isaga tihiin mooyee, hana dilina naftiinna, Alle wuxuu idiin yahay naxariistee**), wuxuu yiri Alle:

**(وَإِنْ كَانَ ذُو عُسْرَةٍ فَنَظِرَةٌ إِلَى مَيْسَرَةٍ وَأَنْ تَصَدَّقُوا خَيْرٌ لَكُمْ إِنْ كُنْتُمْ تَعْلَمُونَ)**

(**Hadduu yahay mid ciriiri ku jiro (Kan wax lagu leeyahay) ha la sugo intay uga fududaato, haddaad sadaqaysataan (ka saamaxdaan) ayaa idiin khayr badan haddaad ogtihiin**) Nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

**(رَحِمَ اللَّهُ رَجُلًا سَمْحًا إِذَا بَاعَ، وَإِذَا اشْتَرَى ، وَإِذَا اقْتَضَى)**

(**Ilaahay ha u naxariisto nin saamaxaya markuu wax iibinayo iyo markuu wax iibsanayo iyo markuu wax gudanayo**), wuxuu leeyahay:

**(رَحِمَ اللَّهُ عَبْدًا سَمْحًا قَاضِيًا ، وَسَمْحًا مُقْتَضِيًا)**

(**Alle ha u naxariisto addoon saamaxaya markuu wax gudayo, markuu gudsanayana saamaxaya**)

Saamaxaadda beeca waxaa laga wadaa inuusan ahaanin iibiyaha mid hantida ku dhinto oo ku qaaliyeeya dadka oo badeecada meel ku xira, miisaankana fududeeya, saamaxaadda iibsashadana waa: inuu ahaado iibsadaha mid sahlan oo aan dadka ka dhimmin xaqooda, samaaxadda gudashadana waxaa laga wadaa: inuu qofka ku dalbado xaqiisa ama deyntiisa si jilicsan oo dhimrin ku jirto iyo dabacsanaan, wuxuu sheegay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - in masaamaxaada la dhaqanka dadka ay tahay sabab ka

mid ah sababaha lagu badbaado aakhiro, wuxuu leeyahay rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

**(دَخَلَ رَجُلٌ الْجَنَّةَ بِسَمَاحَتِهِ قَاضِيًا وَمُتَقَاضِيًا)**

(**Nin ayaa jannada ku galay masaamaxaaddiisa isagoo wax gudaya iyo isagoo wax gudanaya**), Wuxuu leeyahay:

**(حُوسِبَ رَجُلٌ مِمَّنْ كَانَ قَبْلَكُمْ فَلَمْ يُوجَدْ لَهُ مِنَ الْخَيْرِ شَيْءٌ إِلاَّ أَنَّهُ كَانَ يُخَالِطُ النَّاسَ ، وَكَانَ مُوسِرًا ، فَكَانَ يَأْمُرُ غِلْمَانَهُ أَنْ يَتَجَاوَزُوا عَنِ الْمُعْسِرِ ، قَالَ: قَالَ اللَّهُ عَزَّ وَجَلَّ : نَحْنُ أَحَقُّ بِذَلِكَ مِنْهُ ، تَجَاوَزُوا عَنْهُ)**

(**waxaa la xisaabiyay nin ka mid ah dadkii idinka horreeyay, wax khayr ah looma helin, laakin wuxuu ahaa mid dadka la dhaqamo wuxuuna lahaa hanti, wuxuu amri jiray adeegeyaashiisa inay iska dhaafaan qofka culeyska haysta wuxuu yiri: Alle ayaa yiri: annaga ayaa kaga xaqnimo badan, iska dhaafa**), Wuxuu leeyahay nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - asoo ka hadlaya qaar ka mid ah muuqaallada maalinta qiyaame:

**(يَقُولُ اللهُ عَزَّ وَجَلَّ: انْظُرُوا فِي النَّارِ: هَلْ تَلْقَوْنَ مِنْ أَحَدٍ عَمِلَ خَيْرًا قَطُّ؟ قَالَ: فَيَجِدُونَ فِي النَّارِ رَجُلًا، فَيَقُولُ لَهُ: هَلْ عَمِلْتَ خَيْرًا قَطُّ؟ فَيَقُولُ: لَا، غَيْرَ أَنِّي كُنْتُ أُسَامِحُ النَّاسَ فِي الْبَيْعِ ، فَيَقُولُ اللهُ (عَزَّ وَجَلَّ): أَسْمِحُوا لِعَبْدِي كَإِسْمَاحِهِ إِلَى عَبِيدِي)**

(**Wuxuu leeyahay Alle -** ***cazza wajalla*** **-: naarta eega ma u jeeddaan qof waligiisa wanaag sameeyay? wuxuu yiri: naarta waxay ka helayaan nin wuxuu ku dhahaa: waligaa khayr ma samaysay? wuxuu dhahaa: maya: laakin dadka ayaan iska saamixi jiray waqtiga beeca, wuxuu dhahaa: Addoonkayga u saamaxa siduu ugu saamixi jiray addoomahayga**).

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Mabda'a masaamaxaadda islaamka kuma eka dhaqanka u dhexeeya muslimiinta qaarkooda qaarka kale, ee waa manhaj nololeed dadkoo dhan deeqaya, Alle wuxuu yiri asoo amraya addoomihiisa mu'miniinta inay dadkoo dhan wanaag kula dhaqmaan:

**(وَقُولُوا لِلنَّاسِ حُسْنًا)**

(**Dadka wanaag ku dhaha**), wuxuu leeyahay Alle:

**(لاَ يَنْهَاكُمُ اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ لَمْ يُقَاتِلُوكُمْ فِي الدِّينِ وَلَمْ يُخْرِجُوكُمْ مِنْ دِيَارِكُمْ أَنْ تَبَرُّوهُمْ وَتُقْسِطُوا إِلَيْهِمْ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ)**

(**Alle idinkama reebayo kuwa diinta aan idinkula dagaallamin guryiinana aan idin kasoo saarin inaad u sameysaan samafal oona aad u garsoortaan, maxaayeelay Alle waa jecel yahay kuwa garsooreyaasha**).

Cabdullaahi bin Cumar marka ri' loo gowraco wuxuu ku dhihi jiray adeegihiisa: ma u hadiyaysay deriskeena yahuudiga ah? ma u hadiyaysay deriskeena yahuudiga ah?. maxaayeelay waxaan maqlay rasuulka oo dhahaya:

(مَا زَالَ جِبْرِيلُ يُوصِينِي بِالْجَارِ حَتَّى ظَنَنْتُ أَنَّهُ سَيُوَرِّثُهُ)

(**Kama suulin Jibriil inuu igala dardaarmo deriska ilaa aan u maleeyo inuu dhaxalsiin doono**)

Noocyada sahlanaanta waxaa ka mid ah sahlanaanta nafta, taasoo laga wado inay nafta ahaato mid deeqsi oo khayrka u hureyso dadkoo dhan, wuxuu leeyahay Shaafici:

**تســتر بالسـخاء فكل عيـب *** يغطيه كما قيل السـخاء**
**ولا تـر للأعـادي قـط ذلا *** فإن شماتة الأعداء بـلاء**
**ولا ترج السماحة من بخيل*** فما في النار للظمآن ماء**

**Isku astur deeqsinimada ceeb kaste ***
sida la yiri deeqsinimadaa daboosho
Ha tusinin cadowga waligaaga liidnaan ***
Farxadda cadowga waa balaayo
Haka rajeynin dabacsanaan qof bakhayl ah ***
dabka uguma sugna qof oomman biyo**

**Ilaahayow nagu arsaaq fahanka diinteena fahan sax ah, na hanuuni naguna hanuuni, sababna nooga dhig qofka hanuunaya**